

MA KA DIBDHACDAY BIXINTA AMAAHDA GURIGA?



Haddii aad COVID-19 awgiis uga dibdhacday bixinta rahmaadda ama amaahda guriga, waa in aad ogaato barnaamijka caawinta ah ee HomeHelpMN. Waxaa jira barnaamij la yiraahdo Minnesota Housing oo loogu talagalay amaahda guryaha, oo waxaa laga helaa kaalmada aad u baahan tahay, iyo wakhtiga aad u baahan tahay.

Haddii aad ka dibdhacdo bixinta lacagta gurigaaga, waxaad xaq u yeelan kartaa caawimaad dhaqaale si aad dib ugu bilowdo bixinta amaahda guriga.

Waxa kale oo aad xaq u yeelan kartaa bixinta kharashaadka kale sida canshuurta guryaha, ceymiska, lacagta ururka guryaha ama boos kuu direysan.

Haddii ay baahidaadu badan tahay, waxaan kuu gudbin karnaa la-taliye la aqoonsan yahay oo ka socda hay'adda guriyeyta ee HUD.

Booqo **HomeHelpMN.org** si aad u aragato waxyaabaha aad ugu baahan tahay codsigaaga. Markaad soo diyaargarowdo, sameyso kadin ama summad si aad isu diwaangeliso oo guji batoonka codsiga.



TALLAABADA 1aad

Diyaarso waraaqaha lagaa rabo



TALLAABADA 2aad

Sameyso kadin ama summad oo soo dirso codsigaga



TALLAABADA 3aad

Waxaan la xiriireynaa meelaha lacagta kaa sugaya ama lacagta la siinayo



TALLAABADA 4aad

Codsiga ayaa laga shaqenayaa



TALLAABADA 5aad

Lacagta ayaa la bixinayaa ama la siinayaa meelihii kaa rabay

Booqo **HomeHelpMN.org** si aad u hesho faahfaahin

Soo garaac **1 800-388-3226** si aad u hesho caawimo dheeraad ah

ISU DIYAARINTA HOME HELP MN



HomeHelpMN Minnesota Housing waa goob aad ka heleyso caawimaad haddii aad COVID-19 awgiis uga dibdhacday bixinta rahmaadda ama aad ka welweleyso in guriga lagaala wareego. Laakiin ugu horreynta, hoos ka eego waraaqaha aad ugu baahan doonto codsiga:

Caddeynta lahaanshaha gurigaaga waa mid ka mid ah waxyaabaha soo socda (mid keliya ayaa laga rabaa):

- Waraaqaha canshuurta guryaha (waraaqaha la doorbidayo)
- Waraaqada diiwaanka guriga
- Diiwaanka Qandaraaska iibsiga guriga
- Caddeynta Milkiilaha (guryaha ay warshad soo sameysay)

Aqoonsi sawir leh codsadeyaasha oo dhan:

- Aqoonsi goboleed, mid ah federaalka, mid Qabiileed ama aqoonsiga sawirka leh ee codsadeyaasha

Waraaqaha dakhliga:

Keen waraaqaha dakhliga ee ugu dambeeyey ee meel kasta oo aad dakhli ka heshaan adiga iyo xubnaha qoyska ee kugula qoran codsiga. Uma baahnid in aad keento waraaqaha dakhliga shaqada ee xubnaha qoyska ee da'doodu tahay ama ka yar 17 jir. Waxaa jira siyaabo badan oo aad u soo caddeyn karto dakhligaaga. Waxa keliya ee loo baahan yahay waa in qof kasta loo buuxiyo mid u gaar ah:

- Dakhligaaga guud ee canshuur-celiska, sida ku qoran Foomka Canshuur-celinta Dakhliga Federaalka ee 2021 oo noqon kara 1040
- **AMA** Dakhligaaga hadda, adigoo isticmaalaya macluumaadkaaga bixinta lacagta ee kuugu dambeeyey.
 - o Caddeymaha mushaarka
 - o Waraaqaha caddeynta
 - o Waraaqaha xaqu-yeelashada ee barnaamijyada kaalmada dawladda (sida Kaalmada Hawlgabka Dowladda Dhexe)
 - o Waraaqaha xisaabxirka bangiga oo muujinaya dhigashada lacagaha
 - o Waraaqaha kale ee lacag-bixinta
- **AMA** Xubnaha qoyska ee qaangaarka ah ee aan wax dakhli ah lahayn
 - o Saxiixa Caddeynta Dakhli-la'aanta ee dadka qaangaarka ah ee aan dakhliga lahayn oo dhan
- **AMA** Waxa ay ku xiran tahay lambarka boostada deegaanka (zip code), oo waxa lagaaga baahan karaa caddeymo dheeraad ah.

Waraaqaha kaalmada guriyeynta:

- Waa in la keeno caddeymihii ugu dambeeyey ee kharash kasta oo la codsanayo in la iska bixiyo.
 - o **Bixinta rahmaadda:** Waa in la keento lacagta rahmaadda ee ugu dambeysay.
 - o **Lacagta laga bixiyo guriga la jiido/la soo warshadeeyey:** Waa in la keeno caddeynta amaahda ee ugu dambesay
 - o **Kirada guryaha la jiido/la soo warshadeeyey:** Waa in la keeno ogeysiiska lacagihii la soo dhaafay.
 - o **Khidmadaha/kharashaadka iskaashatada, ururka guryaha ama milkiileyaasha guryaha:** Waa in la keeno caddeymihii ugu dambeeyey ee iskaashatada ama ururka guryaha.
 - o **Canshuurta guryaha:** Waa in la keeno caddeyntii ugu dambeysay ee degmada ama dowladda hoose.
 - o **Ceymiska guriga milkiilaha:** Waa in shirkadda ceymiska laga keeno caddeyntii ugu dambeysay ee lacagta ceymiska guriga.
 - o **Qandaraaska iibsashada Guriga:** Waa in la keeno caddeyntii ugu dambeysay IYO koobbiga waraaqaha Qandaraaska iibsashada Guriga.

Waraaqo caddeymo kale ayaa laga yaabaa in loo baahdo, balse waxay ku xiran yihiin xaalado gaar ahaaneed oo la xiriira codsiga.

Codsiga marka la soo gudbiyo ma aha dammaanadqaad lagu helayo kaalmada. Oggolaanshaha dhabta ah ee kaalmada waxa uu ku xirnaan doonaa sida xaq loogu yeesho iyo maalgelinta la heli karo.

